# Naasnuujinta

## WAA MUHIIM

Caanaha naaska waa cuntada ugu fiican, waxaa lagaa helaa waxyaabo fara badan oo wanaagsan ilmahan ubaahan.




*Kama koobna dhamaan booraha bakteriyada wanaagsan.

Qaabka koritaanta ee barnamijka WICga ee California.

*Waa imisa qiimaha caano booraha?*

Quudinta caano booraha wuxuu ku fidhiyaa qarash. WICga waa barnaamij bixiya raashiinka. Mana ku siin doonto caano booro ku filan ilmahaaga. Xaqiiqada qarashka caano booraha waa qarash galaya ilmahaga caafimaadkood, qarashka aan ka hadleyno ee ilmaha waa kana ad ku bixiso taqtarka iyo waqtiga kaaga lumaayo adigoo shaqadii u seegay jirada ilmaha.

## TACLIINTA SAREE E MAREYKANKA TAQAATIRTODA CARUURTA KU TALIYAAN

- In ilmaha la siiyaa caanaha naaska oo keliya ilaa 6 bilood iyo inaad kusii wado naasnuujinta oo lasocoto rashiin adag ilaa dada 1 sano am aka dheer.
- In ilmaha dhaqahii markey dhashaan in hooyada aay maqaar ka maqaar ku qabato, taasi waxey kaa cawineysaa in naasnuujinta sii fiican ku bilaabmo.

## RODOL KASTA TIRSIIMADEEDA!

Naasnuujinta caruurta waxey leh dahay qatarta yare e:

- Saxaro la'aanta, shubanka, caloolxanunka iyo dilaqa
- Neefta, xasaasiyada iyo canbaarta
- Infekshanka dhegta, hergabka iyo kolbo di ariyo
- SIDS ( xaalada dhimashada caruurta lama filaanka ah)
- Cayilka iyo sokorowga
- Kansarka caruurta

### Hooyada naaskanuujisa:

- Waxaa sii dhaqso ah ugu lumayo culeyskii uurka
- Waxaa u kordhayo ka hortaga kansarka iyo sokorowga
- Badbaadin lacag; caanobooraha kharashkiisa wuxuu dhafaa $1,500 sanadkii
- Wuxuu yareeyaa niyad jabka dhalmada
- Dhaqso ayuu ku bogsadaa dhalmada kadib
- Waxaa kuu badbaadaya waqtigii aad ku diyaarin laheyd caanobooraha ama ku nadiifin laheyd dhalada

## S & J

S: maxey WICga u bixisaa caanobooraha?

J: WICga waxey ku talisaa in caruurta la quudiyo naaska, lakiin wey ku siin kartaa haddii loo bahdo. WICga wey ogtahey in caanaha naaska uu yahay rashiinka ugu fiican ee caruurta. Weyna kugu kalmeyneysaa sidaad u naasnuujin laheyd. Hooyada iyo caruurta oo naaska nuuga waxey WICga sii saa rashiin badan bil walba.

S: haddii aan naasnuujiyo iyo caanobooro, miyuusan cunugeyga ka heleenin wax fiican labadooda?

J: caanaha naaska waxaa ku jiro waxyaabo ka caawinaayo cunugaadii wuxuu ahaanayaa caafimaad iyo quwad (fiiri sawirka isna barbardhi). Caanobooraha ma laha ilaalinta difaaca oo caruurta kaga hortaga iney jiradaan. Sidoo kale ku darida caanobooraha cunugadii cuntadiisa taasi waxey la micno tahay naasnuujin yaraan, kaas oo yareynaaya caanahaagii kaa imaanaya.

S: maxaa isbitaalada markey guriga ii diraaya isiiyaan caanobooro?

J: shirkadaha caanobooraha waey ku suuq geliyaan caanobooraha waxey bixisaa tijaabo lacag la'aan ah sii ay dumarka ugu dhiiro geliyaan iney isticmaalaan. U sheeg isbitaalka inaad naasnuujineysid iyo inaadan ubaahneyn caanobooraha

health.mo.gov/wic


MISSOURI DEPARTMENT OF HEALTH AND SENIOR SERVICES
WIC AND NUTRITION SERVICES
P.O. Box 570 Jefferson City, MO 65102-0570 573-751-6204



Un employeur à égalité des chances à l'embauche / discrimination positive.
Les services sont fournis sur une base non discriminatoire.



WIC #481 (5/14)**[Somali]**